



Ilaahay wuu qoray Xasanaadka iyo Dambiyada, ka dibna wuu cadeeyey, Qofka ku hamiya inuu sameeyo Xasano ee aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa Xasano kaamil ah, hadiise uu ku hamijo Xasano oo uu sameeyo Ilaahay wuxuu u qoraa tobantoban Xasano ilaa Todobo Boqol oo laalaab, ilaa laalaabyo badan, qofkii ku hamija Danbi oo aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa Xasano kaamil ah, haduu ku hamijo Dambi oo uu sameeyo waxaa loo qoraa hal Danbi

Ibnu Cabaas Allaha ka raali ahaadee isaga iyo Aabihiyeh waxaa laga wariyey: Wuxuu ka wariyey Nabiga Ilaahay nabadjelyo iyo naxariis Allaha siiyee, Nabiguna Ilaahay ka wariyey inuu yiri: wuxuu Nabigu yiri: "Ilaahay wuu qoray Xasanaadka iyo Dambiyada, ka dibna wuu cadeeyey, Qofka ku hamija inuu sameeyo Xasano ee aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa Xasano kaamil ah, hadiise uu ku hamijo Xasano oo uu sameeyo Ilaahay wuxuu u qoraa tobantoban Xasano ilaa Todobo Boqol oo laalaab, ilaa laalaabyo badan, qofkii ku hamija Danbi oo aan samayn Ilaahay wuxuu u qoraa Xasano kaamil ah, haduu ku hamijo Dambi oo uu sameeyo waxaa loo qoraa hal Danbi.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulku nabadjelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay qadaray Xasanaadka iyo Dambiyada ka dibna uu u cadeeyey laba Malag siday u qori lahaayeen. Qofka damca oo goosta oo u qasda inuu Xasano sameeyo waxaa loo qoraa hal Xasano isago aan samaynba, haduu sameeyo waxaa loo laalaabaa tobantoban laabkeed, ilaa Todoba Boqol oo laalaab ilaa laalaabyo badan, siyaadaduna waa kolba inta ikhlaas Qalbiga ku jirta, iyo wax tarkii uu gudbiyey iyo wixii la mida. Qofka damca oo u qasda oo goosta inuu dambi sameeyo ka dibna Ilaahay darti u daaya waxaa loo qoraa Xasano, haduuse ka mashquulo oo uusan asbaabteeda la imaan waxba looma qoro, hadiise uu kari waayo waxaa loo qoraa niyadiisa wixii ku jiray. haduu sameeyana waxaa loo qoraa hal Dambi.

النّجّات الخيريّة
ALNAJAT CHARITY

